

Haddii aad ka wel-welsantahay
**canuggaaga hadalkiisa iyo
luqaddisaba** uuna ka yaryahay
shan sano jir fadlan ha sugin!

Si aad xog warran u heshid
ama/iyo gudbinba wac
416-338-8255 ama
si toos ah u wac xafiiska kuugu
dhow ee bixiya adeegga hadal-
ka iyo luqadda ee Caruurta Iskool
Tagista Loo Tababaro.

East Quadrant **416-281-7445**
(horey loo yiqiinay Scarborough)
Rouge Valley Health System
Centenary Site

North Quadrant **416-491-1230**
(horey loo yiqiinay North York)
North York General Hospital

South Quadrant **416-921-4498**
(horey loo yiqiinay Toronto & East York)
The Hanen Centre

West Quadrant **416-622-8315**
(horey loo yiqiinay Etobicoke & York)
The George Hull Centre

French Language **416-491-1230**
Services
North York General Hospital



Nagala soo xariir

**Barnaamijka Maqalka ee
Ilmaha Muluqa ah iyo
Adeegga Hadalka iyo
Luqadda ee
Caruurta Iskool
Tagista Loo Tababaro**

416-338-8255
416-338-0025 TTY
416-338-8511 FAX
info@tpspls.on.ca

www.tpspls.on.ca



TORONTO Public Health • Community Partners



Somali



Barnaamijka Maqalka ee
Ilmaha Muluqa ah
&
Adeegga Hadalka iyo
Luqadda ee Caruurta
Iskool Tagista Loo
Tababaro



04-2003-NSGD

Aqoonsiga goor hore, waxay suuro gelinaysaa canugga noloshiisa oo si fiican ku bilaabata

Waxaa aad muhiim u ah in la kobciyo la xiriirka caruurta muluqa ah iyo kuwa iskool tagista loo tababaraaya ba. Aqoonsiga goor hore ee maqal la'aanta, iyo hadal ama luqad la'aanta aad ayey muhim u tahay. Ma jiro canug da'yari darged aan wax loogu qaban karin!

Adeegga Toronto ee loogu talagalay hadalka iyo luqad baradka caruurta ee ka horreya inta aaney iskuulka bilaabin, wuxuu ka kooban yahay:

- adeegga maqalka ilmaha muluqa ah
- adeegga barashada hadalka iyo luqadda

Labada barnaamijba waxaa laga bixiyaa xog warran iyo adeegyo bulshadeed oo lacag la'aan ah ee loogu talagalay caruurta muluqa ah, kuwa socod baradka ah, kuwa iskool tagista loo tababaro iyo waalidkooda ee ku nool Magaalada Toronto. Adeegyadani waxaa laga bixiyaa xarumaha xanaanada caruurta, xarumaha caruurta da'da yar, isbitaalada, xarumaha leyska yimaaddo ee caruurta, xarumaha taakuleynta qoyska, xarumaha caafimaadka ee deegaanka iyo xarumaha bulshada ee xaafadaha.



Barnaamijka maqalka ilmaha muluqa ah

Marka uu dhasho illaa iyo 30 bil jir

- Baris guud oo lagu sameeyo maqalka canug kasta ee dhasha
- U feejignaanta iyo dabagalidda kuwa halista u ah
- Adeegga maqalka
- Adeegga taakuleynta qoyska
- Adeegga kobcinta wada-xiriirka

Adeegyada Hadalka iyo Luqadaha ee Caruurta Iskool Tagista Loo Tababaro

Marka uu dhasho illaa iyo shan sano jir

- Qiyaasid iyo qiimeynba
- La tashiga waalidka iyo barnaamijyada bulshada ee caruurta loogu talagalay ee ku yaalla xaafadda
- Taakuleenta waalidka iyo kulanno warbixineed
- Tababarro loo fidiyo waalidka, daryeeleyaasha iyo xirfadleyaasha kale
- Daaweyn koox ahaan ama/iyo shaqsi ahaan
- U gudbin xarun bulshadeed ee bixisa howlo farabadan ee quseeya canugga iyo waalidkiisa ee xaafadda

